

Doorashada Dugsiyada Barnaamijka Dib-u-hagaajinta u baahan

Waa barnaamij ay heli karaan ardeyda **Program Improvement School Choice (PISC)** waa barnaamij ay heli karaan ardeyda San Diego Unified School District e dhigata dugsiyada muddo laba sanno ah oo isku xigta aan gaadhin heerkaa looga baahnaa ama in ka badan laba sanno aan gaadhin heerarkii looga baahnaa. Iyada oo la raacayo Sharciga Dhigeeya Inaan Ilmo qudheeta la Dayacin (NCLB) oo ah sharci ay dawlada-dhexe soo dejisay, ardeyda deggan ee ku jira dugsiyada Title I oo ah dugsiyada Barnaamijka Dib-u-hagaajinta u baahan waxaa la ogeysiin doonaa ama fursad loo siineyaa inay codsadaan dugsi loo qoondeeyay oo ah dugsi aan barnaamijka dib-u-hagaajinta u baahneyn ee degmada ku yaala. Hadba sida uu tilmaameyo nidaamka waxbarashadda degmadu waxaa la siin doonaa gaadiid ay raacaan.

Ikhtiyaariyada Program Improvement School Choice (PISC) waxay ku eg tahay dugsiyo gaar ah oo la qoondeeyey. Fadlan wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan doorashada dugsiyada la qoondeeyey waxaad wacdaa dugsiiga aad hada dhigatid ama Xafiiska Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah oo telefoonkiisu yahay (619) 725-5672. Waxaa muhim ah inaad ogaataan in barnaamijkanu yahay mid sannad sannad soconeya, koos oo maalgelin xadidan hela. Marka ay dugsiyada deegaanku gaadhaan Horumar Sannadeed ku Fillan (AYP) ee yoolalkii loo dejiyey muddo laba sanno ah oo isku xigta, ardeyda ka diiwaangashan dugsiyada aan barnaamijka dib-u-hagaajinta u baahneyn gaadiid xaq uma yeelan doonaan. Dugsiiga ilaa heerka ugu sareeya wey sii wadi karaan, laakiin gaadiidku wuu ka joogsan doonaa.

Habka Arjiga

Hal arji ayaa loo buuxin doonaa dhammaan barnaamijyada Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah: Magnet, VEEP, Diiwaangelinta Furan, and Program Improvement School Choice (PISC). Arjiga waxaad ka helayaa xaga dambe ee buuggan warbixineed. Arjiyada la qabto inta u dhexeysa Noofembar Iideeda ilaa iyo Febraayo 15 keeda waxaa lagu kala saari doonaa ardeyda buundooyinkoodu hooseeyaan iyo ardeyda ka soo jeeda qoysaska saboolka waxay helayaan mudnaanta ugu sareysa taas oo heerarka fasalka lagu kala saareyo. Liisaska heerka fasalka waxaa loo diri doonaa dugsi kasta oo la qoondeeyey. Dugsiyadu waa inay ardeyda u qaataa sida liiska heer kasta oo fasal u kala horeeyo. Ardeyda ka soo jeeda dugsiyada barnaamijka dib-u-hagaajinta u baahan waxay mudnaanta ka heli doonaan barnaamijyada VEEP iyo Diiwaangelinta Furan ee kuwa dugsiyada aan barnaamijka dib-u-hagaajinta u baahneyn ee soo codsada.

Nidaamka Gaadiidka

Gaadiidka waxaa loo bixiyaa sannad sannad. Gaadiidka loogu talagalay ardeyda PISC wuxuu dhammaaneyaa marka:

- Dugsiiga deegaanka ee ardeyga marka loo aqoonsado inuu gaadhey Horumar Sannadeedkii ku Filaa (AYP) e looga baahnaa
- Dugsiyadii la magacaabay waxay noqdeen Dugsiyada Dib-u-hagaajinta u baahan
- Markey ardeydu heerarka fasalka ka gudbaan (hoose ilaa dhexe ama dhexe ilaa dugsiiga sare)

Haddii gaadiidka ardeyda la siineya uusan sii soconin, ardeygu wuxuu dooraneyaa inuu sii wato dugsiyada helya doorashada ilaa heerka fasal ee ugu sareeya kuwaas oo aysan waxbarashadda degmadu gaadiid qaada siin doonin, ama ardeygu wuxuu ku laaban doonaan dugsiiga deegaanka uu deggan yahay. Sharciyada gaadiidka degmadu ay bixiso barnaamijkan wey khuseeyaan, sida ay barnaamijyada kale ee degmada ee gaadiidka la xidhiidha ay u khuseeyaanba. Waxaa muhiim ah in la xusuusnaado in:

- Si loo sameeyo marino iyo waddooyinka ay basasku marayaan waxaa muhim ah in la helo siddeed ardey oo halkaas baska ka raacaysa.
- Gaadiid qaada lama siineyo ardeyda dugsiyada hoose ee gurigoodu masaafad dhan 2.0 u jiro iyo kuwa dugsiyada sare oo 2.5 maayl u jira.
- Gaadiid ardeyda qaada lama siineyo dugsiyada deegaanka.
- Goobaha ay ardeydu baska ka raacayso ama ku deggayso guud ahaan waa inay u dhaw dahaya dugsiiga deegaanka ee ardeyga.
- Ardeyda dugsiiga hoose waxaa looga baahan yahay inay masaafo jirta hal maayl u lugeyn karaan meesha ay baska ka raacayaan, ardeyda dugsiiga sarena u lugeyn karaan masaafo dhan laba maayl meesha y baskanka qaadan karaan.



Dugsiyada loo aqoonsadey inay yihiin Dugsiyada Barnaamijka Dib-u-hagaajinta u Baahan (PI)

Ardeyda galeysa ama loo qorsheeyey inay galaan dugsiga halkan hoose ku qoran sannad-dugsiyeedka 2009-2010 waxay codsan karaan Doorashada Dugsiyada Barnaamijka Dib-u-hagaajinta u baahan:

Dugsi Hoose	Dugsi Dhexe	Dugsi Sare	Charter
Adams	Bell	Clairemont	Gompers Middle
Alcott	Clark	Crawford CHAMPS	King/Chavez Arts
Audubon	Correia (7-8)	Crawford MVAS	Memorial Academy
Baker	CPMA	Hoover	O'Farrell
Balboa	Farb*	Madison	Dugsi aan caadi ahayn
Burbank	Lewis	Morse	
Carson	Mann	San Diego Business	ALBA Garfield High* Language Academy New Dawn Twain
Carver	Marston	San Diego Communication	
Edison	Montgomery	San Diego Arts (MVPA)	
Emerson/Bandini	Pacific Beach		
Encanto	Pershing		
Garfield	Roosevelt		
Horton	Standley		
Kimbrough	Taft		
Linda Vista	Wangenheim		
Logan	Wilson		
Marshall			
Parks (Rosa)			
Perkins			
Porter			

*Dugsiyada gaadhey yoolalkii looga baahnaa ee sannad-dugsiyeedkii 2007-2008 waxaa laga saareyaa dugsiyada Barnaamijka Dib-u-hagaajinta u baahan sannad-dugsiyeedka 2009-2010.

Dugsiyada ay degmadu u magacawday in la isku qori karo

Waxbarashadda degmadu waxay leedahay dugsiyo gaar ah oo laga diiwaangeliya ardeyda ka timid dugsiyada Barnaamijyada Dib-u-hagaajinta u baahan. Dugsiyadaas waxaa loo magacaabay inay yihiin dugsiyada helaya PISC. Waxaa intaas weheliya, in dugsiyadaas loo sameeyey marino gaar ah oo gaadiidka ardeyda qaadaya ay maraan. Xaaladaha qaarkood waxaa horeyba u jirey basa ardeyda u kala qaadayey barnaamijka VEEP. Xaaladaha kale qaarkood marino cusub oo gaadiidku maraan ayaa la sameeyey. Waalidiintu waa inay soo codsadaan dugsiyada gaarka ah ee ardeydooda inay galaan loogu tala galay ee deegaankooda ku yaalo inuu barnaamijkan lagu soo daro.

HADA SOO WAC!

Araajida waa in la soo gudbiya intaa u dhexeysa bilaaha

Noofember 1 deeda ilaa iyo Febraayo 15 keeda

Fadlan waxaad dugsiga aad hada dhigatid ama Xafiska Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah oo telefoonkiisu yahay (619) 725-5672 wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan dugsiyada helaya PISC.